



FAGAARAHA PIONEER HORUMARINNADA LAGU SAMEYNAYO JIDADKA AY MARAAN DADKA LUGEYNAYA EE BARI GALBEED

Xafiiska Mashaariicda Madaniga ah iyo Kuwa Biyo-xigeenka ee **Magaalada Seattle** ayaa kala shaqeynaya la-hawlgalah bulshada **ee Isbaheysiga Fagaaraha Pioneer (Alliance for Pioneer Square)** in laga sameeyo dhismeyaal horumarineed afar wado oo bari-galbeed dad ka jira kuna yaalla bartamaha Fagaaraha Pioneer. Isbeddeladu waxay mudnaansiin doonnaan jidadka ay maraan dadka lugeynaya, jidadka yaryar ee hareer mara waddooyinka, iyo kordhinta dhirta cagaarka ah ee qaybaha waddooyinka Main, Washington, King iyo Yesler ee inta u dhaxeya jidadka 2nd Avenue iyo Alaskan Way.

Mashruucan wuxuu isku xiri doonnaa Fagaaraha Pioneer iyo beerta biyo-xigeenka (Waterfront) 20-eykar ee cusub, si loo sii wanaajiyoo gaarista dadka da'aadda iyo awoodaha kale duwan leh, iyo si gawaarida looga fogeeyo dagaandaga hoose ee dhisme ahaan nugul si loo wanaajiyoo waayo-aragnimada dadka lugeynaya. Mashruuca wuxuu gacan ka geysan doonnaa xoojinta dib-u-cusbooneysiinta goobaha dadweynaha sida Beerta Occidental Park, iyo taageeridda guud ahaan dhaqanka degmada iyo dhaqdhaqaqa dhaqaalaha.



Muuqashada Jidka Washington St ee wajahaya galbeedka marka laga soo eego dhanka jidka 1st Ave




Muuqashada marka laga soo eego jidka Main St ee wajahaya galbeedka marka la joogo waddada Occidental Ave



WAQTIYADA MASHRUUCA

Waad ku mahadsan tiiin boqolaalka faallooyin iyo isuduwidda bulshada ee tan iyo 2018, waxaan haysanaa nakh-shad kama dambeyis ah. Waa xaan fileynaa in dhismuhu uu bilaaban doonno sannadka 2023 gudahiisa wuxuunna qiyastii qaadan doonaa muddo hal sano ah in lagu dhammeeyo.



Horumarinnada muhiimka ah



- Hareeraha wadooyinka ee lagu socdo oo ballaaran oo ay ku jiraan meelo badan oo bannaan oo loogu talagalay makhaayado
- Isgoysyada waddada oo ammaan ah oo haddana gaaban
- Isgoysyo kor u kacsan oo ku yaalla jidka Occidental Ave si loo xoojiyo isku-xirka waddada dadka lugeeya ay maraan ee waqooyi-koonfureed
- Nakh-shad aan kaabad lahayn oo dejineysa gaadiidka isla-markaanna abuureysa degaan tartiib loogu socdo oo ammaan u ah dadka lugeynaya iyo baaskillada.
- Sii lahaanshaha fursadaha meelo baabuurta la dhigto iyo meelo laga raro oo loogu talagalay ganacsiyada xaafadda



- Malaaska ama laamiga "marinka xariqa badda/shoreline alley" ayaa loo dhigey qaabka nakh-shad calaamadeynaysa xariqa xeebta asalka ah ee biyo-xigeenka ka hor inta aaney degayaashu imaan.
- Iyada oo la kaashanayo Valerie Segrest, oo ah cunto yaqaanad ku takhasustey cuntooyinka dadka asaliga ah iyo xubin ka tirsan Qabiilka Muckleshoot:
 - Sharraxaadda taariikhda dhirta iyo isticmaalka teed alwaax ka sameysan oo ku dhinac gudban halka dhirta lagu beero ee hareer-socodka waddada weyn
 - Looxo fasiraad ah oo ka muuqda sawirro iyo sheeko sheegid lagu sharfayo taariikhda Asaliga ah ee goobta mashruuca hadda
- Dhir badan asali ah oo cagaaran, ayaa qaarkood waxay wax ku biirriyeen hab-dhaqanno dhaqameedka Asaliga ah ee lagu dhaqmo ilaa maanta, sida falkinta xargaha.



SU'AALO?

info@waterfrontseattle.org

206.499.8040

BOOQO MAREEGTADEENNA

waterfrontseattle.org

